

Balaarinta Lynnwood Link: Northgate ilaa Lynnwood City Center



Waxa ay tahay inaad ogaato:

- 1 Line wuxuu ka soo bilaabanaya Northgate ilaa Lynnwood wuxuuna furmi doonaa horaanta xagaaga/dayrta 2024. Tareenadu waxay socon karaan siddeedii daqiqaba mar inta lagu jiro saacadaha ugu shaqada badan ee maalmaha shaqada.
- Adeegga Lynnwood wuxuu qiyaas ahaan labanlaabmi doonaa marka Line 2-aad si buuxda uu u furmo 2025.

Horaanta xagaaga/dayrta 2024, Link light rail wuxuu ku baahi doonaa Northgate ilaa Snohomish County, isagoo u adeegi doona afar boosteejooyin oo cusub: Shoreline South/148th, Shoreline North/185th, Mountlake Terrace, iyo Lynnwood City Center. Boosteejo dheeraad ah ayaa laga furi doonaa NE 130th Street sanadka 2026.

Adeegga Lynnwood waxaa markii hore la qorsheeyay in la furo iyadoo lagu kordhinayo 1 Line (Lynnwood–Angle Lake) iyo 2 Line (Lynnwood–Redmond). Hase yeeshi sababo la xiriira dib-u-dhacyada dhismaha ee buundada I-90 ayaa dib u dhigtay adeega 2 Line inuu noqdo mid si buuxda u shaqeynaya sanadka 2025, adeegga Lynnwood waxa uu marka hore u shaqayn doonaa sidii kaabista keliya 1 Line ahaan, iyadoo tareenada la heli doono siddeedii daqiqo kastaba mar inta lagu jiro saacadaha ugu shaqada badan, 10-kii daqiqo kastaba mar inta lagu jiro xilliga duhurkii, fiidkii iyo maalmaha dhamaadka usbuuca, iyo 15-kii daqiqo kastaba mar inta lagu jiro xilliyada subaxdii iyo goor dambe habeenkii.

Sound Transit waxay sii wadaa nay qiimeyso inta jeer ee tareenadu socon doonaan marka afarta boosteejooyin ee cusub la furo sanadka soo socda. Sound Transit waxay rajaynaysaa in tareenada ay ciriiri geli doonaan wakhtiyada qaarkood sababo la xiriira inay shaqeyn doonaan tareeno ka tiro yar intii la qorsheeyay waxayna ka shaqaynaysa in ay bixiso adeegga ugu badan ee suurtogalka ah.

Waxaad wixii ku saabsan hormarka dhismaha iyo taariikhaha furitaanka adeega ee mashruucan iyo mashruucyada kale ee Transit Sound kala socon kartaa [halkaan](#).

Wakaaladaha shuraakada ah ayaa sidoo kale bedeli doona adeega baska si ay ugu xiriiriyaan tareenada Link. Booqo [King County's Lynnwood Link Connections](#) iyo [Transit Changes page](#) ee Community Transit si aad u hesho wixii faahfaahin dheeraad ah.

Jadwalka/waqtiyadu waa ay isbedeli karaan. Soo jeedinadaan maaha kuwo kama dambeys ah waxaana laga yaabaa inuu isbedel ku yimaado, in qayb ahaan loo fuliyo ama dib loo dhigo iyada oo laga jawaabaayo awoodda hawlgelinta hay'adda iskaashiga.

